Coroners Court of Victoria

What do I do now?
Somali

Maxaan annigu hadda qabanayaa?

Talaabooyinka ugu horreeya ee habka baarista dhimashada

Qoraalkani wuxuu sharxayaa waxyaallaha aad u baahan tahay inaad ogaato isla marka dhimashada qofka aad jeceshahay loo soo sheego xaakimka qaabilsan baarista dhimashada. Macluumaad intaas ka badan la xiriir **1300 309 519** ama booqo websaytkayaga ah **www.coronerscourt.vic.gov.au**

Doorka xaakimka baarista dhimashada

Xaakimka baarista dhimashadu wuxuu baaraa dhimashooyinka qaarkood wuxuuna soo saaraa dhimashada sababta keentay. Ma baaraan dhamaan dhimashooyinka, waxay baaraan keliya;

- dhimashada aan la filayn, aan caadiga ahayn ama rabshad ku timid, ama ka timid shil ama dhaawac
- dhimashooyinka u dhaca si lama filaana inta lagu jiro qaliinka
- dhimashooyinka dhaca marka qofka dhintaa uu ku jiray 'daryeel ama hayn'
- marka dhakhtar aanu awoodin in uu saxiixo shahaadada dhimashada
- Marka aan la aqoon qofka dhintay

La xiriirida ugu horraysa

Shaqaalaha maxkamada ayaa kula soo xiriiri doona wixii ku saabsan talaabada ugu horaysa habka baarista dhimashada. Xaalladaha badankood, haddii qofkaagu ku dhintay Melbourne, waxaa loo qaadi doonaa goobtayada daryeelka ee ku taalla 57-83 Kavanagh Street, Southbank.

Hadii qofkaagu ku dhintay qaybaha kale ee Fiktooriya, waan kula soo xiriiri doonaa si aan kuugu sheegno meesha lagu daryeellayo. Taasi waxay noqon kartaa isbitaal ku yaalla qaybaha Fiktooriya ama SouthBank. Waan ku caawimi doonaa haddii aad doonayso in aad waqti la joogto qofkaaga.

Waan kuu sheegi doonaa qofka noqon doona 'qofka cid ugu dhow'. Macluumaad kasta oo banaanka u baxaya wixii ku saabsan baarista xaakimka qofkaas ayaa lagu soo diri doonaa ama qofka loo magacaabay wakiil.

Aqoonsiga

Xaakimku waa in uu ta'kiidinayaa aqoonsiga qofka dhintay. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad aqoonsato qofkaaga. Si aad u aqoonsato waa inaad ahaataa qof ka mid ah qoyska kaas oo si fiican u yaqaan marka dhimashadu dhacdo.

Xaalladaha qaarkood waxaa laga yaabaa hab sayntiifik ah in lagu aqoonsado. Waan kula hadli doonaa haddii loo baahdo midaan.

Baaritaanka caafimaad

Waxaa la samaynayaa baaritaan si loo ogaado sababta dhimashada. Xataa haddii ay u muuqato wax iska cad, waa wax aad muhiim u ah in aan baarno waxa run ahaan dhacay.

Baaristaanka asaasiga ah

Marka qofka aad jeceshahay oo daryeelkaaga ku jiraa dhinto, waxaa baari doona aqoonyahanka cudurka. Baaristaas asaasiga ahi waxay noqonaysaa mid xadadan.

Shaqaaluhu waxay ka jawaabi doonaan su'aal kasta oo laga yaabo inaad qabto.

Waxaa laga yaabaa in aan ku weydiino macluumaad naga caawimi kara in aan hello diiwaanka caafimaadka qofka aad jecashahay ama macluumaad kale, waxaana laga yaabaa in aan u baahano in aan kaala hadalo xaallada khusaysa dhimashada.

Booliiska ayaa iyaguna laga yaabaa in ay kaala hadlaan dhimashada. Waxay caawimaan xaakimka baara dhimashada in uu ururiyo xaqiiqooyin ku saabsan dhimashada sida ugu dhaqsa badan.

Qalitaanka maydka (autopsy)

Xaalladaha badankood, waxaa loo baahan yahay in maydka la qalo. Qaliinka maydka waxaa badanaa loogu yeeraa qaliinka dhimashada ka dambeeya (post mortem) ujeedaduna waa in uu qaliinkaasi na siiyo macluumaad ku saabsan wixii dhimashada keenay. Waa hab qaliin ah oo uu sameeyo aqoonyahanka cudurada.

Haddii xaakimku go'aansadu in qaliinku lagama maarmaan yahay wuxuu la xiriiri doonaa ugu horayn 'qofka ugu dhow'. Waxaanu u sharxi doonaa habka la qaadayo wuxuuna ka jawaabi doonaa su'aallahaaga. Haddii aad diido qaliinka maydka in la sameeyo, sababa diintaada ama dhaqankaaga la xiriira darteed, ama aad qabto welwel kale, fadlan noo sheeg markaas si waqtigaan aan ugu sheegno xaakimka. Xaakimku waa qadarin doonaa dareenkaaga waxaanuna kula soo xiriiraynaa mar kale si laguugu sheego go'aanka. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan baarista caafimaadka la xiriir **1300 309 519** weydiina Sarkaalka Baarista Hore ama booqo websaytkayaga **www.coronerscourt.vic.gov.au**

Alaabta shakhsiyeed

Dhamaan alaabta shakhsiyeed — sida dahabka, dharka iyo waxyaallaha qiimaha leh — badanaa waxaa ka qaadaa goobta dhimashada booliiska dabadeedna way soo celiyaan. Marmarka qaarkood, booliiska ayaa laga yaabaa inay hayaan alaabta qaarkeed si loo baaro. Haddii kale alaabta shalhsiyeed waxaa la siiyaa agaasimaha aaska. Haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan alaabta shakhsiyeed fadlan noo sheeg.

Qorshaynta aaska

Waxaad la xiriiri kartaa agaasimaha aaska waqti kasta. Agaasimaha aaska ayaa idiin kala dabqaadaya adiga iyo maxkamada kaana caawimaya qorshaha aaska.

Qoyska iyo adeega kaalmada bulshada

Maxkamadu waxay ku bixisaa lacag la'aan, kaalmo muddo gaaban ah iyo talasiin.

Waxaanu siinaa caawimo qaraabada iyo qof kasta oo kale oo ay dhimashadu saamaysay.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Qoyska iyo Adeega Kaalmada Bulshada fadlan nagala soo xiriir **1300 309 519** ama booqo websaykayaga; **www.coronerscourt.vic.gov.au**

Helida shahaadada dhimashada

Xaakimka qaabilsan dhimashada wuxuu siiyaa diiwaangeliyaha Dhalashada, Dhimashada iyo Guurka macluumaad ku saabsan dhimashada si loo diiwaangeliyo dhimashada loona bixiyo shahaadada dhimashada.

Shahaadada Dhimashada Caadiga ah

Adiga iyo agaasimaha aaska ayaa codsan kara shahaadada dhimashada caadiga ah. diiwaangeliyaha Dhalashada, Dhimashada iyo Guurka ayaa soo diri doona shahaadada adiga naftaada ama qof aad adigu magacawday ka dib marka la diiwaangeliyo asbaabaha dhimashada.

Shahaadada dhimashada ee caadiga ah waxaa badanaa loogu baahan yahay sababa dhaqaale iyo ujeedooyin kale oo rasmi ah ee caddaynta dhimashada.

Shahaado dhimasho oo ku meelgaara

Xaalladaha xaakimka qaabilsan dhimashadu aanu weli ogaan sababta dhimashada, Diiwaangeliyaha Dhalashada, Dhimashada iyo Guurka ayaa bixin kara shahaadada dhimashada ku meelgaarka ah. Si kasta ha ahaatee, shahaadada ku meelgaarka ahi ma qeexdo sababta dhimashada, waxaana laga yaabaa in aan loo isticmaalin dhamaan ujeedooyinkooda.

Maxkamaddu waxay kaloo bixin kartaa shahaado ta'kiidinaysa in dhimasho dhacday. Shahaadada ku meelgaarka ah dhamaan hay'adaha dhaqaalaha iyo ama hay'adaha sharcigu uma aqbali karaan ujeedo rasmi ah.

Had iyo jeer waxaa fiican in laga hubiyo hay'ada aad la xaallayso haddii ay aqbalayaan shahaadada dhimashada ee ku meel gaarka ah.

Nambarada muhiimka ah oo aad nagala xiriirayso

(Saacadaha shaqada haddii aan si kale loo xusin)

Compassionate Friends Victoria Inc.	1800 641 091
Family and Community Support Service	1300 309 519
Federation of Community Legal Centres	(03) 9654 2204
Kaalmada iyo U hadlida Dhimashada Warshadaha	(03) 9309 4453
Adeega Turjubaanka	131 450
Mercy Western Grief Services	(03) 9364 9838
National Relay Service TTY Service	133 677 (kuwa maqalku ku adag yahay) 1300 555 727 (hadalka iyo dhegaysiga)
Road Trauma Support Team	1300 367 797 (24ka saacadood)
Diiwaangelinta Dhalashada, Dhimashada iyo Guurka	1300 369 367
State Trustees	(03) 9667 6319 1300 138 672 (meelaha magaalada ka baxsan)
SIDS and Kids Victoria	1800 240 400
Victims Support Agency	1800 819 817
Victoria Legal Aid	(03) 9269 0234
Victorian Aboriginal Legal Services	(03) 9419 3888 1800 064 864 (24ka saacadood)
Victorian Court Information and Welfare Network	(03) 9603 7433 1800 681 614 (24ka saacadood)

Coroners Court of Victoria

57 - 83 Kavanagh Street Southbank 3006
T 1300 309 519 F 03 9682 1206
W www.coronerscourt.vic.gov.au